

Wanaagsantahay in laga warhaayo

HPV

HPV waa faayrus si xoog leh u faafo oo nolosha dambe sababi karo kansar. Tallaalka HPV wuxuu kaa difaaci cudurka kansarka. Dhammaan carruurta waxaa lagu martiqadi tallaalka oo bilaa lacag la'aan oo waxaa bixin kaalkaalisada iskuulka oo fasalka 5.

Cudurada uu HPV sababta u noqdo

HPV waa magaca humant papillomvirus oo la soo gaabshay iyo la kala qaado markii galmo la suubiyo. Faayraska HPV wuxuu kala yahay dhowr nooc, oo noocyadas qaar kamid ah waxey sababi karan in nolosha dambe cudurka kansarka kugu dhaco.

Bulshada inta ugu badan mar un noloshooda wuu ku dhaca HPV, laakin bulshada tirada inta ugu badan ma ka warhaayan maadama uusan eheen mid la dareemi ama muuqdo. Xaaladaha inta ugu badan infekshanka qofka wuu ka fiicnaan, laakin marmar qofka wuxuu haayn muddo dheer. Markas waxaa kordhi halista in nolosha dambe kansarka kaaga dhaco dhuunta, makaanka, xubinta dhalmada (cambarka ama guska) ama malawadka qaybtiiisa hoose.

Sanadkasto Iswiidhan waxaa ku dhaco 800 dumar iyo 300 rag noocyada cudurka kansarka midkood oo faayraska HPV sabab u yahay.

Tallaalka waa difaac ka hortagid

Tallaalka wuxuu kaa difaaci infekshanka inta ugu badan oo noocyada faayraska HPV oo sababikaro kansar. Si uusan infekshanka kugu dhicin waxaa fiican qofka inuu wakhti hore is tallaalo, intuusan qof weeyn oo qaankar noqon iyo inta uusan suubin galmada koowad. Haddii qofka uu qaaday infekshanka noocyada kala duwan midkood oo faayraska HPV tallaalka ma'ka difaacikarto noocyadas oo HPV.

Tallaalka waa mid muddo dheer la soo isticmaalay iyo la soo tijaabiyay

Tallaalka looga hortagi HPV waxaa la siiyay dhowr malyuun qof oo aduunka meelkasto uga nool. Cilmi baaritaanada lagu suubiyay Iswiidhan iyo dhowr wadan oo kale waxaa laga arkay in tallaalka yahay mid difaac wanaagsan leh iyo ah ammaan.

Iswiidhan dhammaan tallaalada HPV waa la diwaangaliya oo waxaa lagu qori liiska qaranka oo tallaalada. Taasna waxey suurtgalin in dabagal lagu suubinkaro in tallaalka yahay ammaan iyo leeyahay saameynta laga doomi.



Folkhälsomyndigheten
PUBLIC HEALTH AGENCY OF SWEDEN

SIDAN BAA LOO SUUBIN TALLAALKA

Kaalkalisda iskuulka waxey cirbada tallaalka kaa qeypta kore oo gacanta. Tallaalka waa labo qeyb. Waxaa ugu yaran u dhax-eyn lix billood tallaalada.

Tallaalka ka hore

La xiriir kaalkaalisada iskuulka oo iskuulka canugaaga dhigto haddii ey jiran su'aalo ama waxkale aad ku fikireysid tallaalka ka hore.

Tallaalka kadib

Waa caadi qofka in dhanqasho ka dareemo, midab gaduud yeelato, bararto ama cuncunto gacanta meesha qofka laga tallaalay. Dadka qaarkood qandho muddo gabban hayso bey dareeman, madax xanuun iyo dareen guud oo sidii qof jiro hayso camal. In allerji [xasaasiyad] laga qaado aad bey dhif u tahay.

Haddii aad ka walwalsantahay caafimaadka canugaaga markii la tallaalo kadib waxaa la xiriiri kaalkaalisada iskuulka ama isbitaalka.

**SKYDD
FÖR LIVET**



Miyaa dooneysa warbixin kale?

Haddii aad dooneysid warbixin dheer tallaalka ka hore, la xiriir kaalkalisada canugaaga iskuulkiisa joogto. Warbixin kale ka akhriso bogga internetka oo Hey'adda caafimaadka bulshada[Folkhälsomyndigheten]:

- Folkhalsomyndigheten.se
- 1177.se
- Lakemedelsverket.se

BARNAAMISHKA TALLAALIDA OO ISWIIDHAN

Tallaalka HPV wuxuu kamid yahay barnaamishka tallaalida oo Iswiidhan.

